


Seattle Qorshaheeda Badbaada waa sida ay Magaaladu u maalgelinayso maalgelinta gargaarka federaalka si'ay uga caawiso magaaladeena inay ka soo kabsato dhibaataadii COVID-19 ee lahayd saamaynta caafimaad iyo dhaqaale. Seattle qaban dhageysi dadweyne iyo doodo si loo ogaado shan meelood oo mudnaanta u leh maalgelinta:

- Guryeyn & Hoy la'aanta (\$100.5 million)
- Fayo-qabka & Adeegyada Dib-u-furista (\$67 million)
- Soo kabashada ganacsiga yaryar & Deganayaasha (\$51million)
- Amaanka & Caafimaadka Dhimirka (\$5.4 million)
- Taageerada Shaqaalaha Magaalada & Adeegyada (\$78.1 million)

Sanduuqa Qorshaha Samatabixinta Seattle Goobaha Muhiimka ah

Wadar guud: Total: \$301.9 million



2022-2023 Qodobbada ugu Muhiimsan Waxqabadka

- Lala shiraakoobay in ka badan 350 hay'ado bulsho iyo kuwo aan faaiido doon ahayn
- La bixiyey adeegyo ka badan 3,700 ganacsi yaryar iyo deeqo in kabadan 50 ururo (iskaashatooyin) ganacsi
- La taageerey in ka badan 4,600 farshaxaniiste iyo shaqaale dhaqameed
- La taageerey kulamo bulsho kuwaa soo soo jiitey in kabadan 700,000 ka qayb gale.
- Waxaa la iibsaday afar dhismo oo bixin doona 411 guri oo cusub oo la awoodi karo
- La taageeyey in ka badan 1,000,000 booqashada xarumo cuntada iyo in ka badan 300,000 cunto ah
- Waxaa la siiyay 690 carruur ah xanaano lacag la'aan ah waxaana lagu abaalmariyay maalgelin mashaariic bixin doona adeegyada daryeelka carruurta 311 carruur ah oo dheeraad ah



Guryeyn & Hoy la'aanta (\$100.5 million)

Hadafka: Deganayaashu waxay heli karaan badbaado, la awoodi karo, iyo doorashooyin guri oo deggan iyo sidoo kale agab guriyeynta degdegga ah.

Tusaalayaal: Hoy iyo wacyigelin dadka ay haysato hoy la'aanta; Dejinta Degdegga ah; Gargaarka kirada degdegga ah; adeegyada weecinta guri la'aanta; waxaa la iibshay 4 guri oo guryo jaban ah



Fayo-qabka & Adeegyada Dib-u-furista (\$67 million)

Hadafka: Qoysaska dakhligoodu yar yahay iyo agab la'aanta waxay dabooli karaan baahiyahooda aasaasiga ah sida cuntada iyo guriyeynta, waxayna ku raaxaystaan bannaanka iyo meelaha caamka ah ee badbaadada leh ee madadaalada iyo caafimaadka soo hagaagay.

Tusaalayaal: Mushahar dheeraad ah oo la siiyo shaqaalaha xanaanada carruurta si'ay u taageeraan shaqaaleysiinta iyo sii haynta; xarumaha xanaanada carruurta iyo deeqaha waxbarasho; kaalmo lacageed oo toos ah oo la siiyo deganeyaasha dakhligoodu hooseeyo; cuntada bulshada; soo celinta saacadaha maktabadda



Soo kabashada ganacsiga yaryar & Deganayaasha (\$51million)

Hadafka: Dadka iyo ganacsiga yaryar waxay heli karaan gargaar si dhaqaale ahaan usoo kabsadaan kadib saameynta COVID-19.

Tusaalayaal: Tababar shaqo iyo adeegyo shaqo-geyn oo loogu talagalay shaqaalaha aan shaqayn iyo kuwa shaqadoodu hooseeyo; kaalmada lacageed ee tooska ah ee ganacsiyada yaryar; taageerada ururada fanka iyo dhaqanka si'ay si badbaado leh dib ugu furto oo dib u shaqaaleysiiso shaqaale; ogolaanshaha dariiqa saxda ah ee cunto-ku-cunista bannaanka iyo wax iibinta; qashinka iyo ka saarista qoraallada



Amaanka & Caafimaadka Dhimirka (\$5.4 million)

Hadafku: Dadka ay saamaysay faafitaanka COVID-19 waxay heli karaan adeegyada caafimaadka maskaxda iyo dhaqanka, iyo ka hortagga rabshadaha iyo taageerada ka hortaga dhexgalka.

Tusaalayaal: Adeegyada wax ka qabashada rabshadaha ku salaysan jinsiga; maalgelinta habdhaqanka iyo caafimaadka maskaxda ee dhalinyarada iyo qoysaskooda; ballaarinta adeegyada caafimaadka dhimirka ee marba goob ku wareega



Taageerada Shaqaalaha Magaalada & Adeegyada (\$78.1 million)

Hadafku: Magaalada Seattle waxay diyaar u tahay si'ay dib ugu bilowdo adeegyada qof ahaaneed si nabadgelyo leh ee xaalada cusub kadib musiiyadii saf-mareenka ahayd waxayna leedahay agab lagu maareeyo lacagaha iyo dadaalka ka soo kabashada masiibada si wax ku ool ah oo hufan.

Tusaale: Waaxda Dabdamiska Seattle Kharashaadka mushaharka ee adeeg bixiyaha koowaad; Nidaamka xaqiijinta tallaalka COVID ee shaqaalaha magaalada; maalgelinta xarunta iyo tignoolajiyada si'ay u taageeraan ku noqoshada xafiiska iyo shaqada ka fog goob shaqeedka